



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35^{aad}

(From 25 September 2017 to 21 January 2018)

March 2018

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35^{aad}](#)

Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 35^{aad}

Mudanayaal,

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan *kal-fadhiga 36^{aad}* ee iminka aynu galayno isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 35^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan waxyaabihii inoo qabsoomay iyo wixii aan inoo qabsoomin.

Ajandihii Kal-fadhigii 35^{aad}

25/11/2017

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda G/W
2. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Xeerarka ka soo noqoday Madaxweynaha :- 1. Xeerka Booliska 2. Xeerka Xabsiyada 3. Xeerka Duulista Hawada	Codayn	Gole waynaha
2.	Xeerka Shirkadaha (Company law)	Codayn	Gole Waynaha
3.	Xeerka ka hortaga Kufsiga	Codayn	Gole Waynaha
4.	Xeerka Maydhiista Lacagta	Codayn	Gole waynaha
5.	Xisaab-xidhka 2014 iyo 2105	Codayn	Gole Waynahaha
6.	Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada	Gole Waynaha	Gole Waynaha
7.	Qabyo-Qoral Xeerka Guud ee Degaanka (National Environment Law)	Akhriska 1 ^{aad}	Gudidda Degaanka
8.	Qabyo-qoral Xeerka Macadanta Somaliland	Arkhiska 1 ^{aad}	Gudidda deganka
9.	Qabyo-Qoral Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo saaristiisa	Akhiska 1 ^{aad}	Gudidda deeganka
10.	Qabyo-qoral Xeerka Dakhliga Shidaalka	Arkhiska 1 ^{aad}	Gudidda Dhaqaalaha
11.	Xisaab –Xidhka 2016	Akhriska 1 ^{aad}	Gud. Illanita Hantida Qaranka
12.	Miisaaniyadda Dawladda 2018	Akhriska 1 ^{aad}	Was.Maaliyadda

13.	Xeerka Qandaraasyada Qaranka	Akhriska2 ^{aad}	Gudidda Ilaalinta Hantida
14.	Qabyo-qoral Xeerka Xawaladaha	Akhriska1 ^{aad}	Gud.Dhaqaalaha
15.	Qabyo-qoral Xeerka ilaalada Xeebaha Somaliland	Akhriska 1 ^{aad}	Gudidda arrimaha Gudaha
16.	Qabyo-qoral Xeerka Aasaaska Hay'adda Qurba Jooga	Akhriska 1 ^{aad}	Gud.Arrimaha Dibada
17.	Qabyo Qoraalka Xeerka Wadooyinka	Akhriska 1 ^{aad}	Gudida Gaadiidka iyo Wadooyinka
18.	Qabyo-qoral Xeerka Tamarta iyo Koroontada	Akhriska 1 ^{aad}	Gudida deganka iyo khayradka

3. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
4. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

Kal-fadhigii 35^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	35 ^{aad}	25/11/2017	21/01/2018

Kal-fadhigii 35aad Golaha waxaa uu qabtay waxqabadkii ugu badnaa iyo Ansiximihii ugu badnaa, maadaamo oo Shir-gudoonka Goluhu is badalay, oo Gudoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen cusub la doortay, isla Markaana Xukuumad cusub ay talada dalka ku guulaysatay, waxaa la ansixiyay masuuliyiin qaran, hadaba waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wixii kal-fadhigii 35aad ajendihisii ka qabsoomey iyo Wax qabadkii Gudiyada Golaha, waxaa kale oo aanu halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 35^{aad} oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 36^{aad}.

Warbixinada Golaha laga hor akhriyay:-

<u>Taariikhda</u>	<u>Warbixinta</u>	<u>Cid akhridey</u>
12/10/2017	Warbixinta Xeerka Maaraynta Deegnka ee Gudida Deganka iyo Kharaadka Dabiiciga ah	Md. Siciid Warsame Ismaciil
12/11/2017	Warbixinta Gudida Dabagalka Hantida Qaranka	Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud

		Gudoomiye Xigeenka Gudidda
18/12/2017	Warbixinta Gudida Dabagalka Hantida Qaranka ee xisaab xidhka 2016	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiyaha Gudidda
25/12/2017	Warbixinta Hanti dhawraha Guud ee Qaranka ee xisaab xidhka 2016-ka	Md. Siciid Saleebaan Mire
30/12/2017	Warbixinta Xeerka Qashinka	Md. Siciid Warsame Ismaaciil Gudoomiyaha Gudidda
07/01/2018	Warbixinta Gudidda Deegaanka ee Xeerka Tamarta iyo Korontada	Md. Siciid Warsame Ismaaciil Gudoomiyaha Gudidda
08/01/2018	Warbixin xildhibaana laga soo doortay Gobolka Awadal oo safar shaqo ku tagay gobolka	Md. Axmed Barkhad Obsiye

Xeerarkii La Ansixiyay ee Madaxweynuhu Dhaqangaliyay:-

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
1.	Xeerka Xabsiyada X.lr, 78/2017	03/12/2017	Maxweynaha
2.	Xeerka Ciidamada Booliska X.lr	03/12/2017	Maxweynaha
3.	Xeerka Hay'ada Duulista Madaniga ah ee Somaliland	03/12/2017	Maxweynaha
4.	Xeerka Shirkada Somaliland X.Lr. 78/2017	09/12/2017	Maxweynaha
5.	Xeerka Maaraynta Deegaanka X.Lr. 79/2017	17/12/2017	Madaxweynaha

6.	Xeerka kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga X.l.r. 80/2017	06/01/2018	Madaxweynaha
7.	Xeerka Wax-barashada Qaranka X.l.r.77/2017	02/01/2018	Madaxweynaha

Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay:-

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Axmed Muusin Seed	Wasiirka Wasaarada Beeraha	13/01/2018
2.	Md. C/wali Sheekh C/Ilaahi	Wasiirka Isgaadhsiinta iyo Technology	13/01/2018
3.	Md. C/rashiid Ducaale Qanbi	Wasiirka Hawlaha Guud iyo Guryaynta	13/01/2018
4.	Marwo. Hinda Jaamac Xirs	Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	13/01/2018
5.	Md. Shiikh Khaliil Cabdilaahi	Wasiirka Diinta iyo Aw-qaafka	13/01/2018
6.	Md. Saleebaan Yuusuf Cali Koore	Wasiirka Horumarinta Biyaha	13/01/2018
7.	Md. Xasan Ismaaciil Yuusuf	Wasiirka Caafimaadka	13/01/2018
8.	Md. Xasan Maxamed Cali	Wasiirka Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga	13/01/2018
9.	Md. Yuusuf Maxamed Cabdi	Wasiirka Horumarinta Maaliyada	13/01/2018
10.	Md. Yaasiin Max'ud Xiir Faratoon	Wasiirka Waxbarashada iyo Sayniska	13/01/2018
11.	Md. Maxamed Muuse Abees	Wasiir ku-xigeenka Warfaafinta	13/01/2018
12.	Mawo. Yurub Abiib Cabdi	Wasiir ku-xigenka X. Xoolaha iyo Kaluumaysiga	13/01/2018
13.	Md. Ciise Axmed Yuusuf	Wasiirka Gaashaandhiga	14/01/2018
14.	Md. C/Ilaahi Abokor Cismaan	Wasiirka Gaadiidka iyo Wadooyinka	14/01/2018
15.	Md. Max'ed Axmed Maxamuud	Wasiirka Maalgashiga	14/01/2018
16.	Md. Maxamed Xaaji Aadan	Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha	14/01/2018
17.	Md. C/raxmaan Faarax Diiriye	Wasiirka Warfaafinta	14/01/2018
18.	Md. Jaamac Maxamuud Cigaal	Wasiirka Macdanta iyo Tamarta	14/01/2018
19.	Md. Maxamuud Xasan Sacad	Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha	14/01/2018
20.	Md. Shukri Xaaji Baandaro	Wasiirka Degaanka iyo H. Reer miyiga	14/01/2018
21.	Md. Yuusuf Mirre Boos	Wasiirka Cayaaraha iyo Dhalinyarada	14/01/2018
22.	Md. Maxamed Muuse Diiriye	Wasiir ku-Xigenka Wasarada Arrimaha Gudaha	14/01/2018
23.	Md. Maxamed Daahir Axmed	Wasiir ku Xigeenka Maaliyada	14/01/2018
24.	Md. C/qani Maxamed Caateeye	Wasiirka Cadaaladda	14/01/2018
25.	Md. Axmeed Kaahin Cabdi	Wasiirka Arrimaha Gudaha	14/01/2018
26.	Md. C/naasir Cumar Jaama	Wasiir ku-xigeenka Caafimaadka	14/01/2018
27.	Md. C/qaadir Max'ed Sh. Max'ud	Wasiir ku-xigeenka Waxbarashada	14/01/2018
28.	Md. Sahal Maxamed Jaamac	Wasiir ku-xigeenka Gaadiidka iyo H. Jidadka.	14/01/2018
29.	Md. Liibaan Yuusuf Cisman	Wasiir ku-xigeenka Arrimaha Dibada.	14/01/2018
30.	Md. Eng. Xuseen Ibraahim Xasan	Wasiir ku-xigeenka Qorshaynta	14/01/2018
31.	Cali Maxamed Qoorseef	Xubin Gudidda Cadaalada ah	20/01/2018



Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah: -

A. Xeerarka GoleWaynaha Horyaal: -

No	Magaca Xeerka	Marxalada
1.	Xeerka Maamulka Qashinka (Waste Management Bill)	Akhriskii labad
2.	Xeerka Hawlaha Ganacsiga Baananka	Akhriskii labaad
3.	Xeerka Maydhista Lacagta	Akhriski labaad
4.	Xeerka Gudidda Dib U-habeynta Shuruucda	(Madaxtoyada ka soo noqdey)

A. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan: -

No.	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha
2.	Xeerka Dhaqaalaha Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha
3.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
4.	Xeerka Macdanta	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
5.	Xeerka Tamarta	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
6.	Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
7.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
8.	Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
10.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka
11.	Xeerka Gudidda Qandaraasyada	Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida
12.	Xeerka Mideynta Cashuuraha	Gudidda Dhaqaalaha
13.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
14.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
15.	Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka	Gudidda Joogtada ah
16.	Xeerka Ilaalada Xeebaha	Gudidda Arimaha Gudaha

Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada.

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.
4. Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.

Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35^{aad}

5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
6. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.
7. Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgelyada.
8. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.
9. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.
10. Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iy Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan, waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii iyo masuuliyiintii ay ka soo talo bixiyeen Ansixintooda.

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladdu waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro, hadaba Guddidu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawlaha qaran, iyadoo ka duulaysa muhiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaani Ee Dawladi, Waxa ay mudanayaasha Guddida Joogtadu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka qaar ka mida.

- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada
- Gudoomiyaha Baanka Dhexe Jsl
- Wasiirka Wasaarada Arimaha Dibeda Jsl
- Guddida Komishanka Doorashooyinka Qaranka
- Maareeyaha Wakaaladda Biyaha Ee Hargeysa



Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Md. Yuusuf Maxamed Cabdi Raage
- Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Technogy-ada Md. Dr. Cabdiwali Sheikh Cabdilaahi Suufi Jibriil.
- Wasiirka Wasaarada Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska Md. Maxamuud Xassan Sacad Iidle (Sajin).
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyada Md. Maxamed Daahir Fureh.
- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maal-gashiga Md. Maxamed Axmed Maxamuud Cawad.

19-02-2018 waxay Gudida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu kormeer ay u jeedadiisu ahayd: -

- Xog-ogaal u noqoshada ilaha dakhli ururinta dalka iyo isbalada ku yimi.
- Qiimeynta korodhka dakhli ee la fili karo xili maaliyadeedka cusub.
- Ka soo warbixinta baahiyaha iyo caqabadaha ka jira ilaha dakhliga ee dalka.

Gudiddu intii ay kormeerka ku jirtay waxay la kulmeel, isla markaana booqdeen goobahan soo socda: -

- Maamulka Dekeda Berbera.
- Maamulaha Kastamka Berbera.
- Maamulka Degmada Burco.
- Maamulaha Kastamka Burco.
- Maamulaha Cashuuraha Beriga Burco.
- Maamulaha Kastamka Magaalada Wajaale.
- Maamulaha Kastamka Magaalada Boorama.
- Maamulaha Cashuuraha Bariga ee Gobolka Gobolka Awdal.
- Maamulaha Cashuuraha Bariga ee Gobolka Gabiley.
- Maamulaha Cashuuraha Bariga ee Magaalada Wajaale.
- Maamulaha Madaarka Cigaal International Airport.



Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah: -

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaaradda Deegaanka Mrw. Shukri Xaaji Ismaaciil Maxamuud (Baandare).
- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha Md. Axmed Muumin Seed Habane.
- Wasiir-ku xigeenka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Iyo Horumarinta Kalluumaysiga
- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Biyaha Md. Saleebaan Yuusuf Cali (koore)
- Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Md. Jaamac Maxamuud Cigaal Maxamed.

14-15/March/2018 Guudiga Degaanka iyo khayraadka Dabiiciga ee Golaha wakiiladdu kal-fadhigaa 35^{aad} kasakaw ansixinta Mudanayaasha xuumahada Waxay Gudiddu kulan Hawleed u qabatay Qabyo Qoraalka Xeerka maaraynta Qashinka Adkaha iyo Dareerha, kaas oo ka qabsoomay Xaarunta Golaha Wakiilada Jamhuuriyada Somaliland iyada oo ay kasoo qayb galeen Ururada bulshada rayidka ah, Dawlada hoose, Wasaaradda caafimaadka, wasaaradda Degaanka, wasaaradda Gacnasiga iyo warsaarada Xanaanada Xoolaha. waxaana lagu falanqeyey, xeerkaasi siduu u noqon lahaa mid dhamaystiran isla markaana wax weyn uga tari lahaa Qashinka kiisa adag iyo kiisa Dareeraha ahba.

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka Md. Dr. Xassan Ismaaciil Yuusuf.
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka Md. Cabdinaasir Cumar Jaamac Raable
- Wasiir ku-xigeenka Waxbarasha Iyo Sayniska Md. Cabdiqaadir Maxamuud Sh. Muxumed Warsame (Dhago-wayne).
- Wasiirka Wasaaradda Waxbarasha iyo Sayniska Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir Faarax.
- Wasiirka Wasaaradda Dhalinyarada Iyo Ciyaarada Md. Yuusuf Mire Maxamed Nuur (Boos).
- Wasiirka Wasaaradda Shaqo-galinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska Mrw. Hinda Jaamac Xirsi Gaani.
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Warfaafinta, Wacyi-galinta iyo dhaqanka.
- Wasiirka Wasaaradda War-faafinta, wacyi-galinta iyo Dhaqanka Md. Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye (Guri-barwaaqo).

Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaaradda Cadaalada Md. Cabdiqani Maxamuud Caateeye Fariid
- Wasiirka Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha iyo Arimaha Dastuurka Md. Maxamed X. Aadan Cilmi Maxamuud.

Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda Iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Qorshaynta Iyo Horumarinta Qaranka Md. Xuseen Ibraahim Xassan Buuni.

Gudidda Arrimaha Guddaha iyo Nabadgelyada.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaaradda Arimaha Guddaha Md. Maxamed Kaahin Axmed
- Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga Md. Ciise Axmed Yuusuf Cabdalle
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Arimaha Guddaha Md. Maxamed Muuse Diiriye Wacays

Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 35^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Masuuliyiinta kala ah: -

- Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Md. Cabdilaahi Abokor Cusmaan Aw-Yuusuf.
- Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka iyo Guryaynta Md. Cabdirashiid X. Ducaale Qanbe.
- Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Md. Sahal Jaamac Faarax

Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.



24/2/2018 Guddid ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka, Gudoomiye 2aad ee Golaha Wakiilada, Xoghayaha Guud, Madax PFM ee Wasaarada Maaliyadu waxay safar ugu baxeen dalka Tanzania, si ay soo eegaan nidaamka shaqo ee ay u shaqeeyaa Hay'adaha ka shaqeeya Qandaraasyada Qaranka. Waftigan uu hogaaminayey Guddoomiye ku xigeen 2aad ee Golaha Wakiilada Md. Dr. Cali Aw Yusuf Axmed, waxay kulamo kala duwan la qaateen hay'addaha ka shaqeeya wax soo iibinta dalka Tanzania, kuwaas oo ka koobnaa isla markaana dabaqayey xeerka wax iibsiga dalka Tanzania (Public Procurement Act) hay'addaas oo kala ahaa: -

- Hay'adda PPRA.
- Hay'adda PPAA.
- Hay'adda PSPTB iyo
- Hay'adda GPSA

oo dhammaantood kuwa shaqeeya xeerka Qandaraasyada Qaranka Tanzania iyada oo ay hay'add kastaaba shaqo gaar ah ka hayso nidaamka wax iibsiga Dalka Tanzania.



Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35aad

Tusaale ahaan Hay'adda wax iibsiga (PPRA) waxyaabaha ay u xilsaarantahay waxaa kamid ah: -

- Hay'addu waxay qaadi kartaa tallaabooyin iyada oo adeegsanaysa awoodeeda shaqo, taas oo lagama maarmaan u ah hagaajinta maamulka, maareynta, daahfurnaanta, xisaabtanka iyo tayada wax soo iibsiga dowladeed.
- La socoshada shuruucda codsiyada , xeerarka, siyaasadaha iyo hababka marka la eego, ama la xidhiidha soo iibsiga dowladeed.
- Diyaarinta dukumiintiga caadiga ah si loo isticmaalo la isuguna xidho wax soo iibsiga dowladeed.
- Samaynta tilmaamaha shaqo ee wax soo iibsiga ee hay'adaha wax soo iibinta iyo kormeerka u hoggaansamaan tilmaamahan, iyada oo loo marayo qiimeyn madaxbannaan si loo helo talooyin lagu hagaajinayo wax soo iibsiga ee hay'adaha wax soo iibinta.
- Soo bandhiggidda warbixinta sanadlaha ah ee Dawladda ee ku saabsan howlaha guud ee nidaamka soo iibsiga dowladeed, oo ay ku jiraan talooyin ku saabsan tallaabooyinka ay qaadayaan Xukuumadda si loo wanaajiyo tayada shaqada wax soo iibsiga.
- Horumarinta, dhiirigelinta iyo taageeridda tababarka iyo siyaasadaha horumarinta xirfadaha ee saraakiisha iyo dadka kale ee ku hawlan wax soo iibsiga dowladeed.
- Samaynta hawlaha kale ee laga yaabo inay dawladdu u xil saarto. Iyadoo Gudiddu dhowaan Golaha hor keeni doonto Warbixinta oo faah-faahsan.

Horumarinta iyo Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Maammulka Golaha:-

Kulamadii Gudidda Adeegyada (Business Committee).

Shirgudoonka Cusub ee Golaha wakiiladu dhawaan doortay ayaa bilowgii Furitaanka kal-fadhigii 35aad waxa uu kulamo gaar gaar ah la yeeshay Gudoomiyayaasha gudiyada, iyo agaasime waaxedyada golaha wakiilada oo uu hor kacayo Xoghayaha guud ee Golaha wakiilada. Xoghayaha Guud ee Golaha ayaa si joogto ah oo todobaadle ah u hawlgeliyey Agaasime Waaxedyada iyo lataliyayaasha golaha, kulamadan ayaa bar bilow looga dhigay isla qjaanqadka iyo socodsiinta hawlaha golahani qaranka u hayo.

27 November 2017 ayay kulan Gaarka ah Shir-gudoonku la yeeshay Gudoomiyayaasha 10-ka Gudi ee Goluhu leeyahay, kulankan ayay ujeedadiisu ahayd dar-dar gelinta hawlaha shaqo ee golaha horyaala iyo sidii kor loogu qaadi lahaa shaqooyinka ay gudiyadu gacanta ku hayaan.

Gudoomiyayaasha gudiyada, shirgudoonka iyo Xoghayaha guud ayaa sida xeer hoosaadka goluhu dhigayo waxa laysku yidhaahda Guddida adeega Golaha (Business Committee)

waxaanay shaqadoodu tahay hogaaminta iyo hawlfududaynta shaqada guud ahaan gole weynuhu u xil saaran yahay.

Waxaana Gudoomiyayaasha gudiyaada shir guddoonku faray inay kor u qaadaan shaqooyinkooda isla markaana ay gole weynaha u soo gudbiyaan xeerarka ay gacanta ku hayaan si waajibkiisa goluhu uga guto. Sidoo kale waxa Kulan gaar ah Agaasimayaasha Waaxaha la yeeshay Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada Mudane Axmed-Yaasiin sh. Ali Ayaanle kulankan oo oo Xoghayaha guud goob joog ka ahaa isaguna soo qaban qaabiyeey ayuu gudoomiye Ayaanle warbixino shaqadooda ku saabsan kaga dhegeystay Agaasime waaxeedyada.

Ugu danbayna waxa uu gudoomiyuhu ku amaanay sida wanaagsan ee ay shaqadooda u gudanayaan isagoo ku wargeliyey in loo diyaar garoobo shaqo badan iyo isla xisaabtan joogto ah si ay inooga soo baxaan midho iyo maxsuul magic iyo maamuusba inoo sameeya Gole ahaan iyo ka qaran ahaanba.

Kulan lagu falanqaynayay Wajiga labaad ee Qorshaha Hiigsiga 2018-22 oo Gudidda Adeega Goluhu (Business Committee) ay yeelatay.

20-21 December 2017 ayay Kulan hawleed ku saabsan dib u eegista wejiga 2aad ee qorshaha 5ta sano ee 2018 ilaa 2022 ee golaha wakiilada yeeshen Guddida adeega Golaha wakiilada (Business Committee). Gudida adeega Golaha Wakiilada ayaa ah Gudoomiyayaasha 10ka gudoomiye Gudi-hoosaad, 3da shirgudoonka golaha ah iyo Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada JSL. Kulankaas Muhiimka ahaa ayaa waxa furay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane Baashe Maxamed Faarax waxaanu u faahfaahiyey Gudoomiyayaasha gudiyaada shaqada kulan hawleedkan lagu lafo guri doono iyo sida hadda xaalada goluhu ku sugan tahay hay'addaha la shaqeeya iyo waxyaabaha la doonayo in qorshe hawleedkan lagu lafo guro.



Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaanle ayaa mudanayaasha u faahfaahiyey ilaa hadda shaqada la qabtay iyo qabyo qoraalka Qorshaha Golaha wakiilada ee 5ta sano oo ay wada jir u soo diyaariyeen Waaxda Qorshaynta Lataliyaaaysha golaha iyo xoghayaha Guud.

Waxaana faaqidaad iyo xog iswaydaarsi lagu Xoojiyey waxna lagaga bedelay qorshahaas isla markaana lagu dhegeystay shaqooyinka ay gudiyadu hayaan iyo sida ay uga goan tahay in hawlahaas dhamaantood loo fuliyo waqtiyada loo qorsheeyey. Kulankaasna waxa lagu soo gebagebeeyey dhamaystirka qorshahaas oo Goluhu dhawaan ansixin doono haddii ilaahay qadaro.

Wufuudii Golaha Timid:-

12/12/2017 waxaa Golaha lagu soo dhoweeyay Wafti ka socday Dalalka Yurub iyo Hay'addaha qaadhaan-bixiyayaasha ah ee Golaha Wakiilada la shaqeeya, waftiga oo kulan saacado qaatay la yeeshay Shir-gudoonka Golaha, Xoghahaya Guud, La-taliyayaasha Mashaariicda iyo Siyaasada iyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, waxaa kulankaas si weyn laysula soo qaaday sidii kor loogu qaadi lahaa wadashaqaynta iyo kaalmaynta Baarlaamanka somaliland taas oo ay aakhirkiina isku afgarteen shirgudoonka iyo weftigaasi.

Shir-gudoonka iyo Waftidu waxay aad uga wada-hadleen waxyaabaha Golaha u qorshaysan ee ay ka mid tahay dhamaystirka Qorshaha Hiigsiga 2017-2022 oo Goluhu ku shaqayn doono shantaas sano iyo doorka ay ku yeelanayaan Hay'addaha iyo Dalalka ay waftiga qaadhaan-bixiyayaashu ka socdeen.



Waftigan ayaa wuxuu dalka u yimi ka qayb qaadashada Xaflada caleemo saarka iyo dhaarinta Madaxweynaha cusub ee Somaliland dhawaan loo doortay waxayna ka mid ahaayeen Wufuudo heer caalami iyo heer Gobol oo Dalka u yimi ama lagu casuumay

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35aad](#)

Caleema saarka Madaxweynaha Cusub ee ku guuleystay Doorashadii dalka ka dhacday 13 November.



Mudane ka geeriyooday Golaha iyo Kuwii iscasilay:-

Intii lagu jiray Kal-fadhigii hore waxaa Golaha ka geeriyooday Rabi Naxariistii Jano ha ka waraabiye Md. Xasan Cawaale Caynaan.

No.	Mudanihii geeriyooday AHN	Taariikdii	Mudanayaashii badalay
1.	Md. Xasan Cawaale Caynaan	21/10/2017	Md. Xasan Xuseen Shide

Dhinaca kale waxaa Golaha iska Casilay Md. Saleebaan Yuusuf Cali Koore oo noqday Wasiirka Horumarinta Biyaha Xukuumada uu Madaxweynaha Cusub Md. Muuse Biixi soo dhisay.

No.	Mudanihii Is-casilay	Mudanayaashii badalay
1.	Md. Saleebaan Yuusuf Cali (Koore)	Md. Axmed Maxamud Caateye

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog-hayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 35aad](#)